

KU DHAQAN XAFIIS D.



# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad

Muqdisho, Tr. 1 Abril 1974

L. 4

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

## FAAFIN BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadu waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay waxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOBNIIN BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 9 Tr. 14 Marso 1974 — *Wakaalad la siiyey Madaxweynaha G.S.K. inay baadhaan dacwadaha Maxkamadaha.*

Bog. 158

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 9 Dishmebre 1973, L. 26 — *Tabar tijaabis ah oo loo furay Garsoore Cusub.*

» 158

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 1 Jennayo 1974, L. 27 — *Assasid Degmooyin.*

» 160

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 21 Febrayo 1974, L. 28 — *Dallacaad Sarkaal Bolista ah.*

» 162

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 21 Febrayo 1974, L. 29 — *Bedel Garsoore Jaalle D. Cali Moxamed Ibrahim M.G.K.*

» 163

Madbacada Dawladda — Muqdisho

SHARCI L. 11, Tr. 17 Abriil 1974.  
Dhisidda Wakaaladda dhismaha Soomaaliyeed  
(Somali Construction Agency).

**GUDDOONSHAHA**  
**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka  
iyo ka Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

**WUXUU DHAQAN GELINAYAA**  
Sharci soo socda:

**QAYBTA 1aad**

**H A B K A G U U D**

**Qodobka 1aad**

**Dhismaha Wakaaladda**

1. Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed (Somali Construction Agency ayaa halkan lagu dhisay oo hadda ka dib la cahan doona "Wakaalad", sii loo gaadho horukac xagga Dhismaha Guryaha iyo Jidadka dalka Soomaaliyeed;
2. Wakaaladdu waxay tahay mid madax bannaan oo jiriid iyo shakhsiyad qaantuuni leh;
3. Wakaaladdu waxay u hoggaansami doontaa xeerkan iyo xeerka soo socda:
  - a) Xeerka Lr. 16, soo baxay 1dii Abril, 1970 iyo toosinii ka dambaysay ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan, faa'iidada xisaabaha sharikadaha sancada iyo ganacsiga, iyo kuwa ku saabsan Mua'sasadaha Amaahda ey qayb ku leedahay Dawladdu;
  - b) Xeerka Lr. 36 taariikh 22 Abriil 1972 ee shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan;
  - t) Xeerka Lr. 58 taariikh 31 Luulyo 1972 ee lacagta Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

**Qodobka 2aad**

**Xubnaha iyo Laamaha Wakaaladda**

Xarunta Wakaaladdu waxa ay ahaan doontaa magaalada Muqdisho waxaanay, haddii ay lagama maarmaan noqoto ku yeelan doontaa Laamo Gobollada iyo Degmooyinka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

**Ujeeddooyinka Wakaaladda**

1. Ujeeddooyinka Wakaaladdu waxay tahay :-  
Inay dhisto jidad, guryo, dakado, gegooyin dayuuradeed, buundooyin, biyo galeenno iyo hawl ku saabsan farsamada madaniga (Ingegneria Civile) ee Dawladdu leedahay ama Wakaaladaha Madaxa Bannaan ee Dawladda;
2. Wakaaladdu awood waxay u leedahay si hawsha loo xil saaray u gudato inay ka qayb gasho "Tartannada ka soo baxa. Wakaaladaha lacagbixinta Caalamiga (International)" iyo he-shiisyo gaar ah oo ay tartan la'aan la dhigato dhinacyo kale.

Qodobka 4aad

**A w o o d**

Wakaaladdu waxay leedahay, iyadoon ku xad gudbin xeerkan, awood ay ku fulin karto ujeeddooyinka ku xusan qodobka saddexaad ee xeerkan.

Qodobka 5aad

**Baadhidda iyo ilaalinta guud**

Ilaalinta guud ee Wakaaladda waxa yeelan doona Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud.

QAYBTA II

**DHISMAHA WAKAALADDA**

Qodobka 6aad

**M a a r e e y e**

1. Wakaaladda waxa madax u noqon doona Maareeye Guud, waxaana lagu qori doona xeer Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka uu soo saaro isagoo tixgelinaaya soo magacaabida Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud, talada Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dawladda;
2. Wakaaladdu waxay ka koobnaan doontaa waaxyo, xubno iyo laamo waxayna awood u leedahay haddii ay lagama maarmaan noqoto inay laamo ka furato Gobollada iyo Degmooyinka si ay hawsha loo xilsaaray u gudato.

Qodobka 7aad

**Hawsha Maareeyaha Guud**

1. Maareeyaha Guud waxa loo xil saaray, isagoo masalaaya Wakaaladda, fulinta ujeeddooyinka qodobka saddexaad ku sheegan, hawshiisuna waxay tahay :-
  - a) Inuu saxeexo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay;
  - b) Waxa uu mas'uul ka noqon doonaa habka maamulka shaqada Wakaaladda, wuxuuna awood u yeelan doonaa inuu sameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda;
  - t) Wuxuu mas'uul ka noqon doonaa lacagta Wakaaladda;
  - j) Inuu ku dhawaaqo wixii qaraar ah ee deg-deg ah isagoo isla markaa ogeysiinaya Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud;
  - x) Inuu bixiyo wixii amar lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan;
  - kh) Inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Wakaaladda ee caadi ah;
  - d) Inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Wakaaladda ee aan caadi ahayn isagoo ka haysta oggolaansha qoraal ah Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud.
2. Marka uu ka maqnaado Maareeyaha Guud ama ay jirin asbaabo ka reeba shaqada, waxa uu u magacaabi doonaa ku simaha Sarkaal ka tirsan waaxyaha Wakaaladda isagoo ka haysta oggolaansho Xoghayaha Dawladda.

Qodobka 8aad

**Xuquuqda qaynuuniga iyo**

**dhaqaalaha ee shaqaalaha Wakaaladda**

Xuquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa xukumi doona xeerka L. 36 taariikh 22 Abriile 1972 ku saabsan shaqaalaha Wakaaladda Madaxa Bannaan.

Qodobka 9aad

**Magacawqa Agaasimayaasha**

Wakaaladdu waxay lahaan doontaa Agaasimaha ama Agaasimayaal Waaxyood (Direttore Dipartimento) oo lagu qori doono xeerka Gudoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaya magacaabidda Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud.

Qodobka 10aad

**Raasamaalka Wakaaladda**

Raasamaalka Wakaaladdu wuxuu ka kooban doonaa :-

1. Lacag Sh. 10,000,000 - oo Dawladda Soomaaliyeed bixiso;
2. Wixii lacag ah ee ka soo gala hawsha ay qabato Wakaaladdu;
3. Wixii lacag ee kayd ah (fondo riserva) sannad kasta ee uu qadaro xeer uu soo saaro Xoghayaha Wasaaradda Lacagta;
4. Wixii qalab jidadka lagu dhiso ee Wasaaradda Hawlaha Guud ay siiso Wakaaladda;
5. Wixii kiro ah (afitti) ee ka soo gala Wakaaladda hanti dhaq-dhaqaaq leh iyo ta aan lahayn ee ay leedahay Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed.
6. Wixii hanti ah ee ku soo gala Wakaaladda deeq ama si kale.

Qodobka 11aad

**Miisaaniyadda Wakaaladda**

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda ku saabsan sannadka maaliyadda soo geleysa isaga oo faahfaahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, waxaanu hor-dhigi doonaa si loo oggolaado Xoghayaha Wasaaradda Lacagta iyo ka Wasaaradda Hawlaha Guud.
2. Miisaaniyadda lacagta sannadka ee Wakaaladda waa inay ahaataa mid la socota oo tixgelisa miisaaniyadda Dawladda.

Qodobka 12aad

**Xidhitaanka Miisaaniyadda**

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda xidhitaanka ee sannadka la soo dhaafay isagoo isku haggajiyey xisaabtii sannadka iyo bandhiggii macaashka iyo khasaaraha Wakaaladda, taana uu u gudbiyaa Wasaaradda Lacagta iyo Hawlaha Guud.
2. Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud waxa uu awood u leeyahay isaga oo la tashanaya Xoghayaha Wasaaradda Lacagta inuu oggolaado miisaaniyadda xidhitaanka wuxuuna amar ku soo bixin doonaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharajka ay bixinayso Wakaaladdu.

**Qodobka 13aad**

**A m a a h**

Wakaaladdu iyadoo haysata Guddoonka Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud wax waa ka amaahan kartaa mu'asasadaha amaahda ee dibedda iyo Bangiyada gudaha ee dalka si ay u hirgeliso xilkii la saaray ama ujeeddooyinka Wakaaladda.

**Qodobka 14aad**

**S h a q a a l e**

Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee Xeerka Shaqaalaha Dawladda Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxaha iyo Shaqaalaha kale ee Wakaaladdu ma gali karaan ganacsi amase farsamo lid ku ah danaha iyo ujeeddooyinka Wakaaladda.

**Qodobka 15aad**

**Maamulka Lacagta**

Maamulka lacagta ee Wakaaladda waxa xukumaya Xeerka n. 58 ee soo baxay 31kii Luuliyo 1972 ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

**QAYBTA III**

**QODOBKA XIDHITAANKA**

**Qodobka 16aad**

**Xeerka Guud**

Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud inuu guddoomiyo xeer guud oo Wakaaladda xukuma si looga hortago dhibaataada ka imaan karta wixii aan ku sheegnayn xeerkan.

**Qodobka 17aad**

**Dhaqan gelidda**

1. Sharcigani hore ayuu ka dhaqan gelayaa waxaana lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya;
2. Sharcigani waa inuu ka mid noqdaa sharciyada rasmiga ah iyo xeerarka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;
3. Qof waliba waa inuu dhawraa oo tixgeliyaa kuna qasbaa dadka kale inay dhawraan sharcigan.

qdisho 17 Abriil 1974.

(JAALLE SAR. GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE)  
GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ESTABLISHMENT OF THE  
NATIONAL CONSTRUCTION  
(Wakaaladda Dhismaha)

Organization & Post

GENERAL

ROAD DEPARTMENT:

- Director
- Clerk typist
- Messenger
- Civil Engineer
- Surveyor
- Foreman
- Heavy plant Operator
- Light plant operator
- Bitume Sprayer
- Driver
- Store - Time Keeper
- Asst. Technician
- Watchman

Laboratory Unit:

- Head of Unit
- Superintendent (Lab)
- Laboratory Tech.
- Laboratory Asst.

Equipment Section:

- Head of Section
- Asst. Mechanical Eng.
- Driver

Workshop Unit:

- Head of Workshop Unit
- Mechanics
- Machinist
- Electro-Technician

- Professional
- Clerical
- Sub-staff
- Professional
- Higher Tech.
- Technical
- Higher Tech.
- Technical
- »
- »
- Clerical
- Aux. Tech.
- Sub-staff

- Professional
- Higher Tech.
- Technical
- »

- Professional
- »
- Technical

- Professional
- Higher Tech.
- »
- »

A3  
C  
D  
A6  
B  
C  
B  
C  
C  
C  
C  
D  
D

1  
1  
1  
3  
10  
10  
30  
15  
20  
20  
3  
10  
4

A  
B  
C  
C

1  
1  
4  
2

A6  
A  
C

1  
1  
1

A  
B  
B  
B

ADMINISTRATIVE

- Director
- Executive
- Clerk typist
- Telephone
- Gardener
- Messenger

Registry

- Registry Clerk
- Registry Clerk
- Clerk typist
- Messenger

Accounts &

- Head of Section
- Budget Officer

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA  
6 Abriile 1974, L. 34.

Magacaawgii idaarada guddiga Kacaanka degmada Caabud-Waaq qa  
... illada beesha.

ASIRKA ARRIMAHA GUDAHA  
... Kowaad iyo tii labaad

**Qodobka 13aad**

**A m a a h**

Wakaaladdu iyadoo haysata Guddoonka Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud wax waa ka amaahan kartaa mu'asasadaha amaahda ee dibedda iyo Bangiyada gudaha ee dalka si ay u hirgeliso xilkii la saaray ama ujeedooyinka Wakaaladda.

**Qodobka 14aad**

**S h a q a a l e**

Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee Xeerka Shaqaalaha Dawladla Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxaha iyo Shaqaalaha kale ee Wakaaladdu ma gali karaan ganacsi amase farsamo lid ku ah danaha iyo ujeedooyinka Wakaaladda.

**Qodobka 15aad**

**Maamulka Lacagta**

Maamulka lacagta ee Wakaaladda waxa xukumaya Xeerka Ir. 58 ee soo baxay 31kii Luuliyo 1972 ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

**QAYBTA III**

**QODOBKA XIDHITAANKA**

**Qodobka 16aad**

**Xeerka Guud**

Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud inuu guddoomiyo xeer guud oo Wakaaladda xukuma si looga hortago dhibaataada ka imaan karta wixii aan ku sheegnayn xeerkan.

**Qodobka 17aad**

**Dhaqan gelidda**

1. Sharcigani hore ayuu ka dhaqan gelayaa waxaana lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya;
2. Sharcigani waa inuu ka mid noqdaa sharciyada rasmiga ah iyo xeerarka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;
3. Qof waliba waa inuu dhawraa oo tixgeliyaa kuna qasbaa dadka kale inay dhawraan sharcigan.

Muqdisho 17 Abriil 1974.

(JAALLE SAR. GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE)

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA



**ESTABLISHMENT OF THE  
NATIONAL CONSTRUCTION AGENCY  
(Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed)**

Organization & Post	Classification	Categ.	Estab.
<b>GENERAL MANAGER:</b>			
General Manager	Professional	A2	1
Executive Officer	Executive	B	1
Clerk typist	Clerical	C	1
Messenger	Sub-staff	D	1
<b>PLANNING &amp; COORDINATION DEPT:</b>			
Director	Professional	A3	1
Clerk typist	Clerical	C	1
Messenger	Sub-staff	D	1
<b>Building Design Sec:</b>			
Head of Section (Eng.)	Professional	A6	1
Civil Engineer	Professional	A	1
Architect	Professional	A	2
Surveyor	Higher Tech.	B	3
Draughtsman	Higher Tech.	B	2
Clerk typist	Clerical	C	1
<b>Road Design Sect:</b>			
Head of Section (Eng.)	Professional	A6	1
Civil Engineer	Professional	A	1
Surveyor	Higher Tech.	B	3
Draughtsman	»	B	2
Clerk typist	Clerical	C	1
<b>ADMINISTRATION DEPARTMENT:</b>			
Director	Administrative	A3	1
Executive Officer	Executive	B	1
Clerk typist	Clerical	C	1
Telephone Operator	Minor Tech.	C	2
Gardener	Sub-staff	D	2
Messenger	Sub-staff	D	1
<b>Registry Office:</b>			
Registry Clerk	Executive	B	1
Registry Clerk	Clerical	C	2
Clerk typist	Clerical	C	1
Messenger	Sub-staff	D	2
<b>Accounts &amp; Personnel Sec:</b>			
Head of Section	Administrative	A6	1
Budget Officer	Executive	B	1

Personnel Officer	Executive	B	2
Accounts Officer	Executive	B	4
Personnel Clerk	Clerical	C	2
Cashier	Executive	B	2
Asst. Cashier	Clerical	C	2
Clerk typist	Clerical	C	4
Messenger	Sub-staff	D	2

**Supply Section:**

Head of Section	Administrative	A6	1
Secretary of Tender Board	Executive	B	1
Store Keeper	Clerical	C	4
Clerk typist	Clerical	C	2
Store Clerk	Clerical	C	3
Watchman	Sub-staff	D	4

**Commerce Section:**

Head of Section	Administrative	A6	1
Dynamite Technician	Higher Tech.	B	1
Crusher Operator	Technical	C	1
Block Maker	Technical	C	1
Driver	Technical	C	3
Store Keeper	Clerical	C	4
Asst. Technician	Aux. Tech.	D	10

**CONSTRUCTION DEPARTMENT:**

Director	Professional	A3	1
Clerk typist	Clerical	C	1
Messenger	Sub-staff	D	1
Civil Engineer	Professional	A6	3
Surveyors	Higher Tech.	B	10
Foreman	Technical	C	10
Joiner-Carpenter	»	C	10
Mason	»	C	10
Painters	»	C	5
Plumber	»	C	5
Electrician	»	C	5
Blacksmith	»	C	2
Steel Fitter	»	C	10
Crane Operator	»	C	3
Driver	»	C	5
Mixer Operator	»	C	3
Store - time keeper	Clerical	C	3
Asst. Technician	Aux. Tech.	D	10
Watchman	Sub-staff	D	4

**ROAD DEPARTMENT:**

Director	Professional	A3	1
Clerk typist	Clerical	C	1
Messenger	Sub-staff	D	1
Civil Engineer	Professional	A6	3
Surveyor	Higher Tech.	B	10
Foreman	Technical	C	10
Heavy plant Operator	Higher Tech.	B	30
Light plant operator	Technical	C	15
Bitume Sprayer	»	C	20
Driver	»	C	20
Store - Time Keeper	Clerical	C	3
Asst. Technician	Aux. Tech.	D	10
Watchman	Sub-staff	D	4

**Laboratory Unit:**

Head of Unit	Professional	A	1
Superintendent (Lab)	Higher Tech.	B	1
Laboratory Tech.	Technical	C	4
Laboratory Asst.	»	C	2

**Equipment Section:**

Head of Section	Professional	A6	1
Asst. Mechanical Eng.	»	A	1
Driver	Technical	C	1

**Workshop Unit:**

Head of Workshop Unit	Professional	A	1
Mechanics	Higher Tech.	B	6
Machinist	»	B	3
Electro-Technician	»	B	3

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

6 Abriile 1974, L. 34.

Magacaawgii idaarada guddiga Kacaanka degmada Caabud-Waaq qaybtiisa Wakiillada beesha.

**WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA**

ISAGOO ARKAY Xaashidii Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 1972 ee lagu maamulo Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeer Guddoomiyaha G.S.K. ee lambarkiisu yahay 49 ee 8dii bisha Febraayo 1973 ee la dhisay Gobollada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO OGAADAY; in ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wakiillada Beesha ee idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Caabud-waaq;

ISAGOO TIXGELINAYA taladii Guddiga Kacaanka Gobolka Galguduud;

**WUXUU GOOYEY**  
Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda Xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxanyihiin waxaa loo magacaabay in ay noqdaan idaaradda qaybta Wakiillada Beesha ee Guddiga Kacaanka Degmada Caabud-Waaq:

- |                           |                                |
|---------------------------|--------------------------------|
| 1. Ibraahim Axmed Nuur    | 6. Cabdullaahi Faarax          |
| 2. Xuseen Diiriye Maxamed | 7. Cabdullaahi Timayar Warsame |
| 3. Ismaaciil Xaaji Faarax | 8. Maxamed Samantar Axmed      |
| 4. Ciiro Maxamed Axmed    | 9. Dahabo Xaaji Mucallin.      |
| 5. Ruun Cumar Obsiye      |                                |

Qodobka 2aad

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.  
Muqdisho, 6-4-1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA EE WASAARADA  
ARRIMAHA GUDAHA  
(S. Gaas XUSEEN KULMIYE AFRAX)

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

6 Abriile 1974, L. 35

Magacaawgii idaaradda guddiga Kacaanka degmada Doolow qaybtiisa wakiillada beesha.

**WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA**

ISAGOO ARKAY: Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juunyo 1972 ee lagu maamulo Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY: Xeer Guddoomiyaha G.S.K. ee lambarkiisu yahay 49 ee 8 bisha Febraayo 1973 ee lagu dhisay Gobollada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO OGAADAY: In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wakiillada Beesha ee Idaaradda Kacaanka Degmada xagga sare ku qoran;

ISAGOO TIXGELINAYA: Taladii Guddiga Kacaanka Gobolka Gedo;

## WUXUU GOOYEV

### Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoos ku qoran yihiin, waxaa loo magacaabay in ay noqdaan Idaaradda Gud-diga Kacaanka Degmada Doolow qeybta Wakiillada Beesha.

1. Jaalle Cabdow Cagmoy Ibraahim;
2. Jaalle Maxamuud Xaaji Maxamed;
3. Jaalle Axmeddeey Xuseen Malas;
4. Jaalle Axmed Nuur Warsame;
5. Jaalle Barre Cabdulle;
6. Jaalle Maxamed Xaaji Muuse;
7. Jaalle Xabiiba Ibraahim Garabuuxis;
8. Jaalle Cali Xasan Shabeel;
9. Jaalle Cabdillaahi Diiriye.

### Qodobka 2aad

### **Dhaqan gal**

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.  
Muqdisho, 6-4-1974.

### XOGHAYAHA DAWLADDA EE WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA (S. Gaas XUSEEN KULMIYE AFRAX)

### **XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

8 Abriile 1974, L. 36.

Magacaawgii idaaradda guddiga Kacaanka degmada Badhaadha qaybtiisa wa-kiillada beesha.

### **WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA**

ISAGOO ARKAY: Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY: Charciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 juunyo 1972 ee lagu maamulo Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY: Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee lambarkiisu yahay 49 ee 8 bishan Febraayo 1973 ee lagu dhisay Gobollada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO OGAADAY: In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Wakiillada Beesha ee Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada xagga sare ku qoran;

ISAGOO TIXGELINAYA: Taladii Guddiga Kacaanka Gobolka Jubbada Hoose;

## WUXUU GOOYEV

### Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoose ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay in ay noqdaan Idaar:dda Guddiga Kacaanka Degmada Badhaadha qeybta Wakiillada Beesha.

1. Jaalle Maxamuud Maxamed Faarax;
2. Jaalle Macallim Daahir Cumar;
3. Jaalle Cabdillaahi Maxamed Cabdiraxmaan;
4. Jaalle Diiriye Diinix Ducaale;
5. Jaalle Gaarane Geedi Xasan
6. Jaalle Sheekh Khaliif Guure Cali;
7. Jaalle Cabdirasaaq Shaafici;
8. Jaalle Akhtar Cismaan Cali;
9. Jaalle Khadiija Bashiir Ismaaciil.

### Qodobka 2aad

## Dhaqan gal

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.  
Muqdisho, 8-4-1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA EE WASAARADDA  
ARRIMAHA GUDAHA  
(S. Gaas XUSEEN KULMIYE AFRAX)

## XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

3 Setembre 1973, L. 37.

Dhul la siiyey Dr. Axmed Shire Maxamuud ku fadhiya 537,51 mq.  
Dhul la siiyey Maxamed Cumar Maxamuud ku fadhiya 537,51 mq.

## WASIIRKA HAWLAHA GUUD

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo Qaynuunkii Koowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY: Amar Xeer L. 115 taariikhdeeduna ahayd 13 Set. 1956;

ANNAGOO ARAGNAY: Arji u soo qortay Cabduraxmaan Xaaji Muumin taariikhdeeduna ahaqd 22 Maarso 1960, Muqdisho - Xaafadda Wardhiigley;

ANNAGOO ARAGNAY: Maadadii dhulka ee lagu dejiyey Xafiiska ku shaqa lahaa, laguna daabacay xaashida rasmiga ah ee Dawladda;